HERITAGE INSTITUTE



# AQOONSIGA DHIJITAALKA

## AH-CAQABADAHA IYO IFAFAALAHA MUSTAQBALKA SOOMAALIYA

Maajo 2023

# Tusmada


1 Nuxurka Daraasadda 4

2 Hordhac 4

3 Habraaca Daraasadda 9

4 Dibu-eegista Daraasadda 10

5 Taariikhda: muuqaalka dhigitalka ah ee Soomaaliya 14

6 Aqoonsiga Dhigitalka ah ee loo Qorsheeyay Soomaaliya 18

7 Faa'iidooyinka Dihin ee Aqoonsiga Dhigitalka ah 21

8 Caqabadaha iyo Khataraha 23

9 Gunaanadka iyo Talabixinaha Siyaasadeed 25

## Ku Saabsan Qoraaga

Abdinassir Sagar waxa uu shahaadada PhD-da ka diyaarinayaa jaamacadda Maastricht Graduate School of Governance (MGSoG). Cilmibaarista uu ku samaynayo PhD-diisa waxa ay baaraysaa xiriirka ka dhexeeya dhijitaal u guuridda iyo awoodaha hay'adaha dowladda, marka loo eego xaaladda guud ee dalka oo ah mid itaal daran, oo colaado ka soo doogay. Waxa uu shahaadada kowaad iyo tan labaad ee jaamacadda ka haystaa Ganacsiga la xiriira Maaraynta Midaamyada Isgaasiinta (Commerce in Management Information Systems), oo uu ka qaatay Jaamacadda Alberta.

## Mahadnaq

Qoraagu waxa uu u mahadcelinayaa Dr. Afyare Cilmi iyo Dr. Uweys Cali oo gacan ka geystey daraasaddan. Fikradahooda xeeshadheer iyo hagitaankoodu waxa ay qaabeeyeen naqshadda iyo habraaca cilmibaarista, iyada oo ay falcelintoodu qurxisay dibu-eegistii ugu danbaysay ee lagu qormatirayay natiijooyinka iyo talooyinka cilmibaariristan. Qoraagu, waxa kale oo uu dadkii la waraystay uga mahadcelinayaa sida ay uga jawaabeen su'aalaha waraysiga iyo sida ay ula wadaageen khibradahooda, aragtiyahooda, iyo fikirkoodaba.

**Xuquuqda daabacaaddan © 2023 | Waxa ay u dhawrsan tahay Machadka Daraasaadka Siyaasadda ee Heritage.**

Akhristayaasha waxa lagu dhiirrigalinayaa in ay sii tarmiyaan xogtan, oo ay iskood u daabacaan, balse sinaba ugama ganacsan karaan. Xaqle ahaan, Machadka Heritage waxa uu si xushmad leh uga codsanaynaa cid kasta oo daabacaddan sii badisaa, in ay mahadnaq iyo nuqul daabacaaddeeda ka mid ah noo hibayso. Adeegsiga khadka tooska ah, waxa aan waydiisanaynaa akhristayaasha in ay ku xirnaadaan macluumaadka shabakadda.

**© Heritage Institute 2023.**

# 1. Nuxurka Daraasadda

Koboca tignoolajiyada iyo horumarka laga gaaray isgaarsiinta ayaa dowladda siiyay awoodo ugub ah oo ay ka mid yihiin, in xogaha loo kaydiyo hab dhijitaal ah, diiwaangalinta ku salaysan sawiridda faraha iyo indhaha (biometrics) iyo ganacsiga ku dhisan habraacyada tignoolajiyadda casriga ah. Horumarradaas ayaa hirgaliyay aragtiyaha cusub ee ay ka midka yihiin aqoonsiga dhijitaalka ah oo ah hannaan uu mishiin akhriyayo xogaha dadka. Iyada oo ay nidaamyada aqoonsiga dhijitaalku door weyn ku leeyihiin ka falcelinta caqabadaha dunida ka haysta dhinaca aqoonsiga, haddana hirgalintooda waxa la gala kulmay carqalado horseeday guuldarrooyin. Cilmibaaristani waxa ay u kuurgalaysaa caqabadaha ku gadaaman iyo mustaqbalka ay leeyihiin nidaamyada aqoonsiga dhijitaalka ah ee Soomaaliya. Daraasaddan ayaa ururinta iyo falanqaynta xogaha u cuskanaysa hab cilmibaariseedka tayo-beegga (qualitative method) iyada oo la xog-waraysanayo xeeldheerayaal farsamo, lana gorfaynayo dokumentiyo wax-ku-ool ah. Natiijada daraasaddan ayaa muujinaysa in iyada oo ay Soomaaliya ka jiraan arrimo uu mihiim u yahay adeegsiga aqoonsiga dhijitaalku, haddana diyaargarowka la xiriira qaab-dhismeedka sharciga ah iyo kaabayaasha dhijitaalka ah ayaa ah kuwo aan fillayn hirgalinta aqoonsiga dhijitaalka ah, waxaana laga yaabaa in iyagu soo kordhiyaanba caqabado iyo khataro waaweyn oo kale. Dowladda waxa lagu waaninayaa in ay samayso latashiyo ballaaran, waana in daneeyayaasha muhiimka ah laga qaybgaliyaa qorsheyaasha hawlaha si aan loo abuurin wacyigalin ku kooban oo barnaamijka cusub ee Aqoonsiga Dhijitaalka ah oo kaliya, balse waa in sida oo kale la xaqiijiyaa u diyaarsanaanta ururrada iyo daneeyayaasha.

# 2. Hordhac

Koboca tignoolajiyada iyo horumarka laga gaaray isgaarsiinta ayaa dowladda siiyay awoodo ugub ah oo ay ka mid yihiin, in xogaha loo kaydiyo hab dhijitaal ah, diiwaangalinta ku salaysan sawiridda faraha iyo indhaha (biometrics) iyo ganacsiga ku dhisan habraacyada tignoolajiyadda casriga ah. Hayaanka tignoolajiyadda dhijitaalka ahi waxa uu sabanka noqday wax soosaarka ugu weyn ee saameeya sida ay dowladdu u shaqaynayso, isdhexgalka bulshada iyo xataa aqoonsiga laftooda. Oslon ayaa 2022 aqoonsiga qofka ku tilmaamay hanti sumad u ah aadamaha oo lagu kala sooco. Kacaanka dhijitaalku waxa uu suuragaliyey aragtida ku salaysan aqoonsiga dhigitaalka ah, iyada oo keentay in aqoonsigii aadamaha loo dhalan-beddelo xog dhijitaal ah oo uu mishiin akhriyayo.” [1]

1. Masiero and Bailur, “Digital Identity for Development: The Quest for Justice and a Research Agenda.”

Nidaamka aqoonsiga dhigitaalka ah ayaa soo shaacbaxaya, waxaana la qabaa in ay jid u yihiin wax ka qabashada caqabadaha adduunka sida hal bilyan oo qof oo aan la hayn dokumenti lagu aqoonsado.[2] Bangiga Adduunka ayaa sheegay in aanay dadka ku nool dalalka soo koraya boqolkiiba 24 haysannin aqoonsi dhijitaal ah, haba yaraatee, dadkaas waxaana dalalkaas u badan Saxare-xigeenka.

## Sandquuqa 1: Qeexitaanno

1. Aqoonsiga sharciga ahi waa astaamaha saldhigga u ah in qofka la aqoonsado, waxaana ka mid ah magaca, jinsiga, goobta iyo goorta dhalashada oo la diiwaangaliyo iyo dowladdu siiso shahaado dhalasho, marka qofku dhasho. Diiwaangelinta dhalashada iyo aqoonsiga sharciga ah, oo ah kuwo Meesha ka maqan waxaa bixin kara uun hay'ad aqoonsi oo sharci ahaan la aqoonsan yahay. ***Qaramada Midoobay***

2. Aqoonsigaa dhijitaalka ah waxa lagu qeexaa “sawirro elekterooni ah oo kaydiya xogta aqoonsiga gaarka ah ee qofka.” ***Bangiga Adduunka***

3. Nidaamka aqoonsiga dhijitaalka ahi waa hannaan aqoonsi oo ku shaqeeya tignoolajiyad dhijitaal ah, taas oo qabata xogta iyada oo la leeyahay ujeeddo ah in si dhijitaal ah loo sugo, aqoonsado, loona sharciyeeyo waxa uu qofku yahay, waxaana intaas dheer kaydinta xogta iyo maaraynta aqoonsiga. ***Bangiga Adduunka***

*“Yoolasha Joogtaynta Horumarka Caalamiga ah oo ay saxiixeen dalalka xubnaha ka ah Qaramada Midoobay ayaa go’aamiyey in dadka oo dhan la siiyo “aqoonsi sharci ah” marka la gaaro 2030, iyada oo la tixgelinayo muhiimadda aqoonsigu u leeyahay horumarka iyo u dhammaanshaha*

Tani waa dhibaato, maxaa yeelay haddii aanu jirin aqoonsi sharci ahi, dadku ma helayaan xuquuq dhammaystiran, waxaanay ka takoornaanayaan dhaqaalaha, bulshada iyo siyaasadda- intaba.[3]

Yoolasha Joogtaynta Horumarka Caalamiga ah oo ay saxiixeen dalalka xubnaha ka ah Qaramada Midoobay ayaa go’aamiyey in dadka oo dhan la siiyo “aqoonsi sharci ah” marka la gaaro 2030, iyada oo la tixgelinayo muhiimadda aqoonsigu u leeyahay horumarka iyo u dhammaanshaha.

Bangiga Adduunka ayaa ku doodaya in uu aqoonsiga dhijitaalka ahi horumarin karo dowladnimada, awoodda maamulka iyo bixinta adeegyada dadweynaha.[4]

2. World Bank, “Inclusive and Trusted Digital ID Can Unlock Opportunities for the World’s Most Vulnerable.”
3. Mosero, “Analysing the Impact of Digital ID Frameworks on Marginalised Groups in Sub-Saharan Africa.”
4. UN, “Goal 16 | Department of Economic and Social Affairs.”

Dawlad-wanaagga, hufnaanta maamulka iyo bixinta adeegyada dadweynaha.[5] Waxa kale oo la filayaa inay qiime dhaqaale u abuuraan waddamada[6], waxaana loo aqoonsaday in ay lagama maarmaan u yihiin ka mid noqoshada aqoonsiga, ilaalinta bulshada, gargaarka bani-aadannimo iyo waxyaabaha kale ee qaybta ah SDGs.[7] Si kastaba ha ahaato'e, waxa la ogaaday in mashaariicaha aqoonsiga dhigitalka ahi ay yihiin kuwo aad u kharash badan. Waxa kale oo tirada lagu "daray in ay aqoonsiga dhigitalka ahi uu marar badan ka tago[8]" oo aan lagu darin dadka saboolka ah iyo kuwa jilicsan. Waxa kale oo laga yaabaa in ay weheliyaan xadgudubyo ka dhan ah xuquuqda aadamuhu.[9] Waxa khatarahan horseed u noqon kara isku-xirnaan la'aanta, goldaloolooyinka ku jira akhris-qoraalka dhigitalka ah ee ka jira meelo badan oo dunida ah, xeerarka gaabiska ah iyo fahanka gurracan.

Adduun-weynaha waxa laga hirgeliyay noocyo kala ah aqoonsiga dhigitalka ah. Tusaale ahaan, waxa la ogyahay in ay Istooniya tahay dalkii kowaad ee fuliyay aqoonsiga dhigitalka ah ee ay dawladdu hoseedka ka tahay, kaas oo ay muwaaddiniintu u adeegsan karaan wax-is-dhaafsiga onlaayka ah, codbixinta, helista adeegyada nabdoon sida bangiyada iyo caafimaadka.[10] Si taas la mid ah aqoonsiga dhigitalka ah ee Hindiya oo loo yaqaanno Aadhaar waxa loo qaabeeyay in uu bixiyo aqoonsi gaar ah oo la aqbali karo ay fududdahay in la xaqiijiyo oo gooni u ah muwaaddin kasta iyada oo la adeegsanayo farsamada cabbiraadda indhaha iyo faraha iyo xogta sooyaal-qofeedda.[11] Taariikhdu markii ah ahayd Julaay 2022kii, in ka badan 1.3 bilyan oo qof ayaa la siiyay tirsi ah aqoonsiga Aadhaar,–kaas oo ahaa tirsi-aqoonsiyeed gaar ah oo ka kooban 12 god oo gooni ah iyo cabbiraadda indhaha iyo faraha.[12] Waddamada kale ee leh waxa ka mid ah Malleeshiya oo leh aqoonsi dhigital ah oo waajib ah (Maamulka aqoonsiga qofka MyKad[13]), Dheenmaarig ayaa dhawaan soo saartay aqoonsi-samayn dhigital ah, oo qofeed, oo danabaysan (electronic) (Aqoonsiga danabaysan ee Dheenmaarig MitID[14] ), kaas oo fure u aahaa inay dadku helaan adeegyada dawladeed iyo kuwa gaarka ah ee onlyaanka ah iyo aqoonsiyo badan oo laga sameeyay qaarado kala geddisan.

---

5. World Bank, "Inclusive and Trusted Digital ID Can Unlock Opportunities for the World's Most Vulnerable."
6. Mckinsey, "Digital ID: A Key to Inclusive Growth | McKinsey."
7. Geteloma, Ayo, and Goddy-Wurlu, "A Proposed Unified Digital Id Framework for Access to Electronic Government Services."
8. Van der Straaten, "Identification for Development It Is Not."
9. Dixon, "A Failure to 'Do No Harm' - India's Aadhaar Biometric ID Program and Its Inability to Protect Privacy in Relation to Measures in Europe and the U.S."
10. Estonia, "Estonia ID-Card."
11 Mir et al., "Realizing Digital Identity in Government: Prioritizing Design and Implementation Objectives for Aadhaar in India."
12. UIDAI, "Aadhaar Dashboard."
13. Malysia Governemnt, "MyGOV - MANAGING PERSONAL IDENTIFICATION | MyKad Registration."
14. Denmark, "Electronic ID in Denmark - MitID | Nordic Cooperation."

## Sandquuqa 2: Qeexitaannada

| |
|---|
| 1. Cabbiraadda indhaha iyo faruhu waa astaamo qofeed oo la qiyaasi karo sida indhaha, faraha ama wejiga kuwaas oo lagu karo cabbiro iskood isu wada |
| 2. Aqoonsi-samaynta aasaasiga ahi waa hab garasho oo sharci taas oo loo sameeyay in lagu maamulo aqoonsiga bulshada guud ah, iyada oo ujeeddadu tahay in dawladdu dadka ku aqoonsadto sida warqadda aqoonsiga, oo ay aqoonsiga ku helaan wax-is-dhaafsi iyo adeegyo ballaaran |
| 3. Aqoonsi-samaynta shaqaynaysaa waa hab aqoonsi oo uu adeeggu xuddun u yahay, waxaana loo abuuraa in lagu maamulo aqoonsiga iyo xaqiijinta ujeeddooyin gaar ah sida codbixinta, mashaariicda wax is dhaafsiga, adeegyada maaliyadda iwm. |

Afrika waxa jooga dad lagu qiyaasay 500 milyan oo qof, kuwaas oo aan haysannin aqoonsi sharci ah.[15] Gol-dalooladani waxa ay badanaa ka dhalataa khilaafyada iyo barbaxyada ku laran, awoodda liidata ee ay dawladuhu kaga gaabiyaan inay fuliyaan diiwaangelinta, ee ah qaadista ama joogtaynta istaatikada muhiimka ah iyo caqabado gaar ah sida kharashka, meelaha lagu nool yahay iyo qodobbo kale.[16] Marka taariikhda la fiiriyo, dhawr dawladood ayaa isku deyay in ay la jaanqaadaan habka aqoosniga iyaga oo hirgelinaya farsamada cabbiraadda indhaha iyo faraha, xilliyada loo baahdo dokumentiyada laga rabo adeegyada caafimaadka, faylalka cashuuraha, helitaanka waraaqaha socdaalka, furitaanka bar-xisaabeeyada bangiyada iyo kaararka lacagaha lagula baxo ee meelo badan oo Afrika ah.[17]

Si loo fahmo hannaanka u guuritaanka aqoonsiga dhigitalka ah ee Afrika inta lagu jiro 2020-2020, Midawga Afrika waxa waxa uu ku jiraa habkii waddamada xubnaha ka ah loogu samayn lahaa qaabdhismeedka siyaasadda aqoonsiga dhigitalka ah.[18] Waddamo ay Nayjeeriya ka mid tahay ayaa sameeyay isku-dayo dhawr ah si ay u hirgeliyaan mashruuca aqoonsiga dhigitalka ah. Mahruuca aqoonsiga dhigitalka ah ee Nayjeeriya oo la bilaabay 2009kii, waxa uu hadda diiwaangeliyay illaa 56 milyan oo qof.[19] Waddamo kale oo reer Afrika ah ayaa awoodda saaray habab aqoonsi oo dhigital ah iyo farsamada cabbiraadda indhaha iyo faraha si ay u diiwaangeliyaan shaqaalaha rayidka ah, oo ay si gaar ahna ugu aqoonsadaan.

15. Dahan and Sudan, "Digital IDs for Development."
16. Maina Waruru, "Africa's Invisible Millions Survive without ID Documents."
17. AU, "The Digital Transformation Strategy for Africa (2020-2030) | African Union."
18. Bhandari et al., "Towards the Evaluation of Socio-Digital ID Ecosystems in Africa."
19. NIMC, "Enrolment Dashboard June 2021."

> **“** *Kiiskani waxa uu adeegsanayaa aqoonsiyada dhigitalka ah ee loo sameeyay waddamo badan sida diiwaangelinta dhigitalka ah, aqoonsi-samaynta iyo xaqiijinta, hubinta taariikhda ee is-wadda, kaydinta cashuuraha ee dhigitalka ah, codbixinta onlaynka ah, diiwaangelinta dhulka iyo lacag-bixinta nabdoon ee dhigitalka ah*

Soomaaliya waxa ay ka mid tahay waddamada laga bilaabay aqoonsi-samayn ku fadhida cabbirka indhaha iyo faraha ee aasaasiga ah.[20] Waxa la sheegay inay heshiis is-fahan la saxeexatay Haayadda Xog-dhawrka Qaranka iyo Diiwaangelinta Baakistaan ee NADRA si ay u hirgeliso hab aqoonsi dhigital ah.[21] 2019kii, waxa ay dawladda federaalka ah ee Soomaaliya dhaqan-gelisay mashruuc ah diiwaangelinta cabbirka indhaha iyo faraha, taas oo ay u samaysay ciidanka. Waxa ay taasi sababtay in meesha ka baxaan 9000 askari oo ahaa rooxaan ah ama caagleyaal ahi.[22]

Kiiskani waxa uu adeegsanayaa aqoonsiyada dhigitalka ah ee loo sameeyay waddamo badan sida diiwaangelinta dhigitalka ah, aqoonsi-samaynta iyo xaqiijinta, hubinta taariikhda ee is-wadda, kaydinta cashuuraha ee dhigitalka ah, codbixinta onlaynka ah, diiwaangelinta dhulka iyo lacag-bixinta nabdoon ee dhigitalka ah.[23] Marka laga tago adeegsiyada xaaladahan dihin, mashruucyada aqoonsiyada dhigitalka ah ee Afrika waxa ay wajaheen dhawr caqabadood, oo ka soo bilaabmaya sharciga illaa kaabayaasha, kuwaas oo sababay in dhawr mashruuc ay ragaadaan. Yesha iyo Shruti (2021) waxa ay weriyaan in hababka aqoonsiga dhigitalka ah ee Afrika aanay mudnaan siinnin waaqaca-gaar ahaan dhibaatooyinka qaab-dhimseedka sida goldaloolooyinka sharci, baahida kaabayaasha, carqaladaha dhaqan iyo kuwa diimeed, jiritaan la'aanta akhris-qoraalka dhigitalka ah iyo maqnaanta hababka la-xisaabtanka ah ee xooggan.

Waxyaabaha soo baxay waxa ay caddaynayaan baahiyada loo qabo fahan dhammaystiran, oo laga haysto saadaasha iyo caqabadaha ku gedaaman aqoonsiga dhigitalka ah ka hor inta aan hirgelinta la bilaaban. Tani, waa mid run ku ah waddamada la midka ah Soomaaliya ee ka soo kabanaya dagaallada ee dib u dhisaya laamaha dawladda. Qodobbadani waxa ay saamayn doonaan natiijada aqoonsiga dhigitalka ah, waana kuwo u baahan in la fahmo.[24]

Ma jirto daraasad cilmi ah, oo heerka aqoonteenna ugu fiican illaa hadda lagu sameeyay si loo furfuro caqabadaha ku salaysan waaqaca iyo fursadaha laga helayo xaaladaha ay nugleeyeen khilaafyada, ee aan haysannin ICT horumarsan iyo meel ay kooban yihiin xeeraarka la xiriira aqoonsiga, ilaalinta xogta, doorarka kala geddisan iyo masuuliyaduhu. Sidaas awgeed, warqaddani waxa ay isku deyaysaa inay iftiinka ku shiddo fursadaha dihin iyo caqabadaha ku laran aqoonsiga dhigitalka ah ee Soomaaliya. Waxa ay si gaar ah uga warcelin doontaa weydiimaha raacaya ee ah; waa maxay adeegsiyada dihin iyo faaiidooyinka ka dhalanaya hirgelinta aqoonsiga dhigitalka ah ee Soomaaliya iyo sida oo kale caqabaha iyo khataruhu?

---

20. Burt, “Somalia Launching Foundational Biometric Identity Program | Biometric Update.”
21. Hiiraan, “Biometric Payment Systems Improves Conditions for Soldiers in Somalia.”
22. Waal, “Renewed Hope.”
23. Mckinsey, “Digital ID: A Key to Inclusive Growth | McKinsey.”
24. Mir et al., “Realizing Digital Identity in Government: Prioritizing Design and Implementation Objectives for Aadhaar in India.”

# 3. Habraaca Daraasadda

Cilmi-baaristani waxa ay daba socotaa hannaan tayo oo cilmi-baariseed, si loo go'aamiiyo faaiidooyinka uu leeyahay iyo caqabadaha hor yaalla habka aqoonsi-samaynta Soomaaliya ee la soo jeediyay. Lafagurkan wax turjumayaa waa mid habboon waayo waxa uu si qoto dheer u faaqidayaa fahanka mawduucyada, waxaana uu oggolanayaa in la garto dulucda marka laga eego dhinacaya ka qayb-qaateyaasha oo ah waayo-arag aqoon u leh mawduucan. [25]

Lafagurkan waxa qayb ka ah sharraxaadda dokumentiyada (dib u eegista waxyaabaha qoran) iyo waraysiyo u eg kuwo la habeeyay (waraysiyada khubarada). Sharraxaadda warbixinaha iyo dokumentiyada siyaasaddu waxa ay kaalmaysay dejinta nuxurka, horumarinta iyo fahanka bilawga aqoonsiga dhigitalka ah ee Soomaaliya iyo daahfurka aragtiyaha ku jira su'aalaha cilmi-baarista.[26] Baaritaanno lagu sameeyay internetka ayaa sal u ah dokumentiyada.

Taas lidkeedana, waraysiyo u eg kuwo la habeeyay oo lala yeeshay khubarada ayaa kaalmeeyay, oo sababay aragtiyaha ka yimi waayo-aragga ee la xiriira faaiidooyinka iyo caqabadaha ku xeeran habka aqoonsi-samaynta dhigitalka ah ee Soomaaliya. Dadka la waraystay waxa ay isugu jireen khubaro farsamo iyo kuwo siyaasadeed labadaba, oo ka shaqeeya dawladda, ururrada aan dawliga ahayn iyo aqoonyahannada. Isku-darka farsamooyinka iyo la-waraystayaasha kala geddisani waxa ay gacan-qabatay in waxyaabaha soo baxay lagu xaqiijiyo hab ah ah saddex dhinac.[27]

Fountain's (2001) qaab-dhismeedka dhaqangelinta tignoolajiyadda kaas oo kala saara tignoolojiyadda ujeeddada leh (tegnoolaji sida loo naqshadeeyay) iyo tignoolajiyadda la dhaqan geliyay (tignooloji sidii loo adeegsaday) ayaa lagu dabbaqay. Kala duwanaanshiyaha u dhexeeya naqshadeynta iyo adeegsiga ayaa tilmaamaya in dowladuhu ay u adeegsadaan tignoolajiyadda siyaabo iyaga u gaar ah iyo in natiijadu kala duwan tahay iyadoo ku xiran sifooyinka dawladda oo ay ku jiraan macnaha guud ee ay ku shaqeyso iyo awoodaheeda.[28] Iyada oo ku saleysan qaab-dhismeedkan, tignoolajiyadda xoojineysa nidaamyada aqoonsiga dhijitaalka ah iyo qabanqaabada haayadaha lagama maarmaanka u ah nidaamka ayaa lagu sifeyn doonaa. Caqabadaha la dareemayo, faa'iidooyinka, adeegsiga suurtagalka ah, iyo arrimaha saamaynta ku leh hirgelinta nidaamka aqoonsiga dhijitaalka ah ee Soomaaliya ayaa la sahamin doonaa.

25. Hennink, Hutter, and Bailey, Qualitative Research Methods.
26. Bowen, "Document Analysis as a Qualitative Research Method."
27. Heale and Forbes, "Understanding Triangulation in Research."
28. Mu, Haershan, and Wu, "What Organizational Conditions, in Combination, Drive Technology Enactment in Government-Led Smart City Projects?"

# 4. Dibu-eegista Daraasadda

Aqoonsiga dhijitalka ahi waxa uu xiriir la leeyahay horumarka dhaqan-dhaqaale, waxaana la lagu asteeyaa "barbilawga shakhsiyaadku ay ku raadiyaan xuquuqahooda, ku helaan adeegyada dadweynaha, ee ay kaga faa'iideystaan noocyada gargaarka bulshada ee aadka loogu baahan yahay"[29]. Waxa la rumaysan yahay in uu ka qayb qaadan karo wanaajinta isla-xisaabtanka iyo dhisidda awoodda dawladnimo, taasina waxa ay keentay, in la dardargeliyo ka midho-dhalinta himilooyinka horumarineed ee SDGs.[30] Waxa lagu soo gebagebeeyay in aaladaha dhigitalka ahi ay saameyn xun ku yeelan karaan adeegsadeyaasha, oo ay xitaa u horseedi karaan natiijooyin xun sida faquuqa[31]. Saamaynahani waxa ay ku sii xumaan karaan bulshooyinka la haybsooco ee khatarta ugu jira in xaaladdoodu ay sii liidato oo la takooro, iyada oo laga xiray nidaamka ama si dhiig-miirasho ah looga faa'iidaysto xogtooda.[32]

Ka sokow saamaynta taban, haddana hababka aqoonsiga dhijitalka ah waxaa loo xushay fududaynta helitaanka adeegyada caalamiga ah; sida daryeelka caafimaadka iyo adeegyada la daneeyo sida mareegaha/shabakadaha badbaadada bulshada.[33] Gelb and Clark (2013) waxa ay sahamiyeen hababka aqoonsiga ee salaysan cabbirka indhaha iyo faraha ee loo isticmaalo ujeeddada horumarinta. Waxa ay heleen laba hab oo kala duwan oo ah gaarsiinta/qaybinta iyo baahida ku salaysan aqoonsiga. Kiisaska ay dabada ka riixayso qaybinta ama gaarsiinta bulshadu, nidaamyada aqoonsiga aasaasiga ah waxaa abuuray dawlado ujeeddadoodu tahay inlagu xiro waxyaabo ay ku xiran tahay nolosha bulshadu. Kiisaska ay sababto baahidu, habab aqoonsi oo gaar ah ayaa marka hore loo soo bandhigaa ujeeddooyin gaar ah sida codbixinta ama lacagaha la dhigtobangiyada.

> "Dhanka kale, iyada oo ay jiri karaan meelmarin iyo faa'iidooyin badan oo ku duugan hababka aqoonsiga aasaasiga ah, waxa culays noqon kara kharashka bilowga ah ee sarreeya iyo isku-dubbaridka lagama maarmaanka ah ee ka dhexeeya dawladda iyo ilaalinta rabitaanka siyaasadeed

In kasta oo ay dawladuhu mid qura ku bilaabi karaan, haddana waxa jira faa'iidooyin iyo khasaareyaal lagu xusay dib-u-eegista daraasadda. Tusaale ahaan, u wareejinta hababka aqoonsiga ku salaysan shaqada ee aasaasiga ah; midkood waxa ay la xiriiraa kala reebitaanka suurtagalka ah in kasta oo ay jirto dhiirrigelin lagu guubaabinayo qaadashada muwaaddinku. Dhanka kale, iyada oo ay jiri karaan meelmarin iyo faa'iidooyin badan oo ku duugan hababka aqoonsiga aasaasiga ah, waxa culays noqon kara kharashka bilowga ah ee sarreeya iyo isku-dubbaridka lagama maarmaanka ah ee ka dhexeeya dawladda iyo ilaalinta rabitaanka siyaasadeed.[34]

29. Masiero and Bailur, "Digital Identity for Development: The Quest for Justice and a Research Agenda."
30. Gelb and Metz, Identification Revolution.
31. Masiero and Arvidsson, "Degenerative Outcomes of Digital Identity Platforms for Development."
32. Mosero, "Analysing the Impact of Digital ID Frameworks on Marginalised Groups in Sub-Saharan Africa."
33. Masiero and Bailur, "Digital Identity for Development: The Quest for Justice and a Research Agenda."
34. Gelb and Clark, "Identification for Development."

Dibu-eegista daraasadda, waxa lagu xusay caqabado dhowr ah, kuwaas oo la xiriira qaabeynta, horumarinta iyo qaadashada hababka aqoonsiga ee dhijitalka ah. Tusaale ahaan, Sen (2019) waxa uu aamminsan yahay in hawsha ugu adag ee samaynta nidaam aqoonsi oo wax-ku-ool ahi ay tahay hubinta in xeerarka, siyaasadda, tignoolajiyadda iyo saadku ay si isku mid ah u socdaan (bogga 7). Arrin kale oo lagu xusay inay walaac tahay ayaa ahayd kharashka[35].

Dhibaatooyinku intaas oo keliya ma aha. Mosero (2021) waxa ay daraasaddeeda ku qeexday labada caqabadood ee sharci iyo farsamo ee saamaynta ku leh qaab-dhismeedka aqoonsiga dhigitalka ah ee kooxaha la takooro ee ka hooseeya Saxaraha Afrika. Waxa ay ogaatay in loo baahan yahay "dokumentiyada taranka" sida shahaadooyinka dhalashada si loo helo aqoonsiga dhigitalka ah oo lagu takooray kooxo cayiman. Waxa kale oo ay ogaatay in xog la'aanta iyo kalsooni-darrada ay horseedayaan aragtida bulshada oo liidata, taas oo saamaysay xiisaha iyo qaadashada hababka aqoonsiga dhigitalka ah. Mosero waxay ogaatay in walaacyada dhawrsanaanta xogta ee ka jira waddamo badan, in la tixgeliyey keliya ka dib marka hawlgalku bilaabmay. Caqabadaha farsamo ee la xiriira nidaamyada aqoonsiga dhigitalka ah waxa ka mid ahaa caqabadaha is-waafajinta meelaha ay ka jiraan habab shaqaynaya oo badan, kaabayaasha liita, iyo isku xirka xaddidan ee meelaha miyiga ah iyo khataraha amniga internetka.

Ogah (2021) waxa uu damcay in uu furfuro caqabadaha isku dhafka iyo is-waafajinta hababka aqoonsiga dhigitalka ah ee kala duwan ee Afrika, isaga oo baaraya kiiska Najeeriya. Waxa uu tilmaamay dhowr caqabadood oo la mid ah kuwa aan kor ku soo sheegnay. Si kastaba ha ahaato'e, waxa uu sida oo kale helay loollan-gudeed ka dhexeeya Haayadaha, taas oo keentay in la waayo wada-shaqaynta, wadaagista xogta iyo kala duwanaanshaha xogta la hayo, taas oo caqabad ku ah ururrada. Waxa kale oo jiray arrimo tayada khuseeya oo ku saabsan cabbiraadda indhaha iyo faraha ee la ururiyay. Maqnaanshaha keydka xogta ee dhexe, adeegga hubinta iyo xaqiijinta dhexe ayaa sida oo kale caqabad ku noqday dedaallada la isku waafajinayo nidaamyada kala duwan.

Daraasado dhowr ah ayaa lagu sameeyay Afrika si loo fahmo caqabadaha aasaasiga ah ee hababka aqoonsiga dhigitalka ah. Bhandari iyo al. (2021) waxay isku dayday inay baaro xaaladda nidaamyada aqoonsiga dhigitalka ah ee 10 waddan oo Afrikaan ah. Waxa ay ogaadeen in dalal dhawr ahi aanay lahayn aragti istiraatijiyadeed oo ballaaran, sharciga ilaalinta xogta iyo caddaynta doorarka daneeyayaasha gaarka ah iyo kuwo guud ee kala duwan.

35. Gelb and Clark.

Waxa ay ka warbixiyeen arrimaha ka qayb noqoshada iyo khataraha gaarka ah. Intaa waxaa dheer, waxa ay ogaadeen in waddamo badan ay haayadaha gaarka ahi heleen qayb ka mid ah xogta aqoonsiga dhigitalka ah ee dalka, ama in shirkado shisheeye ay rakibeen teknoolajiyadda taas oo fududayn karta in xogtaas lala socdo.

Bajpai & Biberman (2021) ayaa si aad ah u qiimeeyay nidaamka aqoonsiga dhigitalka ah ee Kiiniya, kaas oo la bilaabay 2013kii. Iyada oo qorayaashu ay bogaadinayaan ujeeddooyinka nidaamka cusub ee aqoonsiga, waxa ay tilmaamayaan dhowr cilladood, oo ay ku jiraan baahiyaha loo qabo si loo sameeyo caddaynta aqoonsiga sida, sinnaan la'aanta helitaanka ee caqabaduhu keenaan, jiritaan-la'aanta ilaalinta xogta dhammayska tiran iyo qaab-xogeedka gaarka ah, kuwaas oo jiray kaddib illaa 2019kii oo la ansixiyay xeerka ilaalinta xogta qaranka. Fulinta hindisaha aqoonsiga dhigitalka ah ee Kiiniya waxaa dhawaan xannibay maxkamadaha iyada oo dalku uu ka maqan yahay qaab-dhismeedka sharci-dejintu, si la isu waafajiyo nidaamka aqoonsiga cabbiraadda indhaha iyo faraha iyo werwerka ku saabsan sirta iyo ilaalinta xogta[36].

Caqabado kuwaas mid ah ayaa sidoo kale lagu aqoonsaday daraasado kale. Xirsi iyo Mahad Allah (2021), oo labaduba ka soo shaqeeyay in Soomaaliya laga hirgeliyo nidaamka aqoonsiga qaran, waxay sahamiyeen carqaladaha jira, caqabadaha hor istaagaya iyo sidoo kale xalalka suurtagalka ah ee lagu dhisayo nidaamka aqoonsiga qaran ee aqoonsiyada meelaha mugdiga ah - dalalka aan weligood si buuxda u shaqaynnin nidaamka aqoonsiga. Soomaaliya oo ay daraasad ahaan u adeegsaday, waxa ay hawlqabadkooda ku ogaadeen in Haayado siyaasadeed oo aan horumarsaneyn, jiritaan la'aanta dhaqan aqoonsi, kalsooni darro ka dhalatay wacyi-gelin la'aanta, iyo in khilaafka Haayadaha dawladdu ay caqabad ku yihiin sameynta nidaamka aqoonsiga.

Eke iyo al. (2022) waxa ay rabeen inay aqoonsadaan welwellada la xiriira nidaamka aqoonsiga dhigitalka ah ee Nayjeeriya. Waxay ku soo gebagebeeyeen in sirta, amniga, kharashyada, aaminaad-la'aanta iyo suurtagalnimada xadgudubyada xuquuqda aadamuhu ay yihiin welwellada ugu weyn ee dadka Nayjeeriya. Arrimaha kale ayaa ahaa musuqmaasuqa habraaca iyo ku lug lahaanshaha shirkado caalami ah oo aan la hubin doorkooda. Maqnaanshaha sharciga ilaalinta xogta, ka-ganacsiga suurtagalka ah ee xogta muwaaddiniinta, iyo caddayn la'aanta cidda heli doonta xogta ayaa ah sababta lagu sheegay in ay wiiqayso aamminaadda iyo kalsoonida dadweynaha.[37]

36. Eke et al., "Nigeria's Digital Identification (ID) Management Program."
37. Eke et al.

Caqbado kuwaas la mid ah ayaa haystay waddamada ka baxsan Afrika. Nidaamka aqoonsiga dhigitalka ah ee qaranka Jumayka, oo isku dayay inuu adeegsado sirdoonka dad-sameega ah, ayaa la kulmay xaalad la mid ah ka dib markii waddanku qaatay sharci muran dhaliyay, kaas oo qasab ka dhigay diiwaangelinta. Xeerkaas waxaa tirtirtay maxkamadda sare oo go'aamisay in "hababka xog-ururinta iyo hab-maamuuska adeegsiga xogta loogu talagalay aanay si ku filan u dammaanad qaadin ixtiraamka iyo ilaalinta asturnaanta, iyo in aanay jirin ilaalin ku filan oo lagaga hortagayo si-xun-u-adeegsiga iyo ku xadgudubka xogta la ururinayo.[38] Dunn (2020) waxa ay ogaatay in sharcigaas si degdeg ah loo ansixiyay kolkii hore, si loo daboolo meertada maalgelinta ee deynta laga helayo bangiga horumarinta

Inta badan daraasadaha ayaa baadhay nidaamka Aadhaar ee Hindiya / nidaamka aqoonsiga dhigitalka ah, Aadhaar waxa lagu ammaanay gaaritaankiisa (1.3 bilyan kaadhadhka la soo saaray)[39] iyo kharashka ($1.16 celceliska kharashka barnaamijka diiwaangelinta)[40], iyo sidoo kale casharrada iyo dhaqanka ugu fiican. Qaadashada aragtida guusha muhiimka ah, U.B. Mir et al. (2019), waxa uu baaray nidaamka Aadhaar isaga oo aqoonsaday seddex shay oo muhiim u ah nidaamka aqoonsiga dhigitalka ah, kuwaas oo kala ah: gaarnimada, amniga, iyo sirta. Waxa kale oo ay aqoonsadeen xawaaraha, qiimaha, iyo ku habboonaantu inay yihiin arrimo qeexaya waxqabadka nidaamka. Ka mid noqoshada, shaqdo-wadaha, caddaynta mustaqbalka iyo miisaanku; waa arrimaha kale ee loo aqoonsaday inay muhiim u yihiin nidaamka aqoonsiga dhigitalka ah.

Sen (2019) waxa uu aqoonsaday casharrada nidaamka Aadhaar, ku dhawaad toban sanno kaddib markii la hirgeliyay. Waxa uu iftiimiyay habka ah "aqoonsiga ayaa horreeya" uu mudnaanta leeyahay, ee aan ahayn go'aaminta jinsiyadda ama bixinta xuquuqaha, laakiin taa beddelkeeda ah in la dhiso "qofka uu yahay[41] ". Waxa uu xoogga saarayaa diiradda ka mid noqoshada iyo tallaabooyinka sida hababka gaarka ah si loo soo saaro xogta cabbiraadda indhaha iyo faraha ee dadka ay haystaan caqabadaha la xiriira shaqada ama gol-daloolooyinka.

Waxa uu u ololeeyaa awood-siinta dadka iyo tixgelinta adeegsadeyaasha naqshadaynta barnaamijka. Mabda'a ah 'wax dhib ah ha sameynnin' ayaa sida oo kale loo soo jeediyay inuu yahay "mabda'a hagaya gogosha dhammaan nidaamyada aqoonsiga cabbiraadda indhaha iyo faraha ee dhigitalka ah".[42] Waxa uu ku talinayaa in dalalku ay qaataan habka horumarinta istiraatijiyadeed ee aqoonsiga" iyo inay qiimeeyaan xaaladdooda maaraynta aqoonsiga, dibna u eegaan baahiyahooda, oo ay dejiyaan istiraatiijiyad.[43] Waxa kale oo uu soo jeedinayaa in sharciga nidaamyada aqoonsiga dhigitalka ahi uu caddeeyo baaxadda dabbaqaaddooda iyo hababka lagu ilaalinayo xogta marka la eego sida loo isticmaalo, loo galo, iyo sida loola wadaago cid saddexaad.[44]

38. Dunn, "Risking Identity: A Case Study of Jamaica's Short-Lived National ID System."
39. UIDAI, "Aadhaar Dashboard."
40. Sen, "A Decade of Aadhaar: Lessons in Implementing a Foundational ID System."
41. Sen.
42. Dixon, "A Failure to 'Do No Harm' - India's Aadhaar Biometric ID Program and Its Inability to Protect Privacy in Relation to Measures in Europe and the U.S."
43. Gelb and Clark, "Identification for Development."
44. Beduschi, "Digital Identity: Contemporary Challenges for Data Protection, Privacy and Non-Discrimination Rights."

> Ka faa'iideystayaashu waa in ay si firfircoon uga qaybqaataan inta lagu jiro habka abuurista agabka siyaasadda ee nidaamyada aqoonsiga dhijitalka ah

Dunn (2020) waxa uu carrabka ku adkeeyay baahida loo qabo kormeerka baarlamaanka ee sharciga la xiriira hababka aqoonsiga dhigitalka ah iyo adeegsiga xogta fudud (software) ee aqoonsiga wejiga. Ogah (2021) waxa uu ku taliyay in la sameeyo qaab-dhismeedka siyaasadda ee is-waafajinta iyo is-dhexgalka. Ka faa'iideystayaashu waa in ay si firfircoon uga qaybqaataan inta lagu jiro habka abuurista agabka siyaasadda ee nidaamyada aqoonsiga dhijitalka ah.[45]

# 5. Taariikhda: muuqaalka dhigitalka ah ee Soomaaliya

Qaybta muhiimka u ah hawlqabadka aqoonsiga dhigitalka ahi waa kaabayaasha internetka, isku xidhnaanta, iyo akhris-qoraalka dhigitalka ah. Taasi waa sababta lagama-maarmaanka ka dhigaysa in marka hore la fahmo muuqaalka dhigitalka ah ee Soomaaliya iyo in la qiimeeyo in adeegyadaasi ay jiraan iyo in kale.

Si la mid ah dalal badan oo reer Afrika ah, wax adeegga internetka ee Soomaaliya la aasaasay markii ugu horreysay dabayaaqadii 1990nadii, taas ayaana suurtagelisay in hab onlaayn ah la isugu xiro khadka iyo xawaaladaha qabta adeegga degdegga ah. Kaabayaasha dhigitalka ah ee Soomaaliya iyo kor u qaadistoodaba waxaa bilaabay, oo waday maalgashadayaasha gaarka ah, kuwaas oo ku maalgeliyay hanti ka badan $190 milyan 10kii sanno ee la soo dhaafay.[46] Sannadkii 2013kii ayay ahayd markii shirkadda is-gaarsiinta Hormuud ay dalka oo dhan ka hirgelisay adeegga 3G-ga; ee isku xirka moobillada si ay u bixiso adeeg internet ah oo xawaarihiisu sarreeyo.[47] Sannadkii 2014kii, qaar ka mid ah hawl-wadeennada ayaa soo bandhigay adeegyada LTE-ka oo ah tignoolajiyadda casriga ah ee 4G ee ay isticmaalaan inta badan taleefannada casriga ahi.


Magaalada caasimadda ah ee Muqdisho, waxa ay leedahay giraanta weyn ee miiqa internetka (fiber), iyada oo dalka intiisa kalena ay ugu xiran yihiin isku-xidhka hirka weyn (microwave).[48] Laga soo bilaabo Jenaayo 2022kii, waxaa Soomaaliya ku sugnaa 2.27 milyan oo qof, oo adeegsada internetka, taas oo muujinaysa inay internetka galaan 13.7%. [49] Celcelis ahaan xawaarihiisu waa 1.59 Mbps halka celceliska qiimaha 1 GB uu yahay 0.63 USD, taas oo Soomaaliya ka dhigaysa kaalinta 42aad ee caalamka oo dhan marka laga soo tago 233 waddan oo kala duwan.[50] Tirakoobyadani waxa ay muujinayaan kala qaybsanaanta dhigitalka ah - farqiga u dhexeeya kuwa heli kara internetka iyo kuwa aan haysannin - taas oo ay taageerayaan helitaanka iyo awood u yeelashadu.

45. Bhandari et al., "Towards the Evaluation of Socio-Digital ID Ecosystems in Africa."
46. Fortune of Africa, "ICT and Telecom Sector."
47. Hiiraan, "Mobile Customers Gain Access to 3G Technology in Mogadishu."
48. Kelly and Dunand, "Overview of Digital Development in the Horn of Africa."
49. Kemp, "Digital 2022."
50. Cable UK, "Worldwide Mobile Data Pricing 2022 | 1GB Cost in 233 Countries."

“
*Inkasta oo ay jirto kala qaybsanaanta iyo kala-duwanaanshaha dhijitalka ah ee baahinta internet-ku, haddana isku-xidhnaanta Soomaaliya waxa ay sahashay in muwaaddiniinta, ganacsatada iyo dawladduba ay helaan internetka oo ay lacag ugu diraan moobillada*

Inkasta oo ay jirto kala qaybsanaanta iyo kala-duwanaanshaha dhijitalka ah ee baahinta internet-ku, haddana isku-xidhnaanta Soomaaliya waxa ay sahashay in muwaaddiniinta, ganacsatada iyo dawladduba ay helaan internetka oo ay lacag ugu diraan moobillada. Horraantii 2022kii, waxaa Soomaaliya joogay 2.05 milyan oo adeegsada Facebook.[51]

Waxaa intaa dheer, waxay u oggolaatay ganacsiyadu inay ku shaqeeyaan joogitaanka internetka, fududeeyaan xawaaladaha degdegga ah, oo ay ku xayeysiiyaan wax-soo-saarkooda. Iyada oo loo marayo ICT-yada, gelitaanka ganacsiga caalamiga ah[52] ayaa horumaray, taas oo u oggolaatay ganacsiyadu in ay si fudud alaab uga soo dejiyaan alaab-qeybiyeyaasha caalamiga ah.  Shirkadaha warbaahinta dhigitalka ah ayaa sidoo kale soo baxay dhawrkii sanno ee la soo dhaafay.




## Ganacsade Soomaali ah oo lacag  ka  diraya moobilka

Dawladda Federaalka Soomaaliya waxa ay daah-furtay siyaasaddii ugu horreysay ee ICT iyo istiraatiijiyad lagu taageerayo horumarinta qeybta ICT-ga iyo horumarinta bulshada iyo dhaqaalaha bulshada. Siyaasaddu waxa ay diiradda saartay isku xidhka internetka iyo awood-u-helidda, kaabayaasha dhijitalka ah, aqoonta dhijitalka ah, iyo adeegsiga dawladda ee ICT si ay u bixiso adeegyada.[53]

Dawladda Federaalka iyo Dawladaha xubnaha ka ah Dawladda Federaalku; labaduba waxa ay qaateen nidaamyo dhigital ah si ay u qabtaan maamulka maaliyadda dadweynaha, una bixiyaan oggolaanshaha, iyo, xaaladaha qaarkood, xitaa diiwaan-gelinta guryaha iyo shaqaalaha.

51. Kemp, “Digital 2022.”
52. Elmi and Ngwenyama, “Examining the Use of Electronic Money and Technology by the Diaspora in International Remittance System.”
53. FGS, “National-ICT-Policy-Strategy-2019-2024.Pdf.”

Tusaale ahaan, Dowladda Federaalka waxa ay soo bandhigtay Nidaamka Maareynta Maaliyadeed ee Soomaaliya (SFMIS) oo si iskii ah loogu bixiyo mushaharka, si hufanna loogu qabto dakhliga.[54] Waxa ay adeegsatay nidaamka diiwaan-gelinta cabbiraadda indhaha iyo faraha si ay u diwaangeliso shaqaalaha militariga, ugana saarto askarta jinka ah (caaglaha) nidaamka mushahar-bixinta.[55] Nidaamkan waxaa hadda adeegsada in ka badan 500 oo qof, oo ka kala socda 70 wasaaradood, waaxyo iyo haayado.

> *Soomaaliya gudaheeda, dhawr hab oo aqoonsi ayaa ka jira; iyada oo qaarkoodna ay ku saleysan yihiin cabbirka indhaha iyo faraha*

Dawladdu waxay kale oo ay bandhigtay Nidaam onlayn ah oo lagu diiwaangeliyo ganacsiga Soomaalida (SBRS) si loogu daro ganacsiyada iyo bixinta liisannada, loona xaqiijiyo sax ahaanshaha shahaadooyinka iyo liisannada ganacsi ee Soomaalida.[56] Marka la joogo dawladaha xubnaha ka ah Federaalka, guddiga ku meel gaadhka ah ee doorashooyinka Buntlaan ayaa qaatay nidaam ku salaysan hab cabbirka indhaha iyo faraha; si loo diiwaan geliyo codbixiyayaasha doorashada ugu horreysa ee hal qof iyo cod ah ee saddex degmo oo ka tirsan Puntland Soomaaliya gudaheeda, dhawr hab oo aqoonsi ayaa ka jira; iyada oo qaarkoodna ay ku saleysan yihiin cabbirka indhaha iyo faraha.[57] Marka la joogo Heerka Federaalka, Waaxda Socdaalka iyo Jinsiyadaha ayaa bixisa baasaboorro iyo waraaqo aqoonsi oo gaar ah oo soo qabanaya 10 farood, sawirro dhigital ah, iyo sawirrada indhaha.

Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliya waxa ay sida oo kale adeegsadeen tignoolajiyadda cabbirka indhaha iyo faraha si ay ula socdaan faahfaahinta cabbirka indhaha iyo faraha ee ciidammada qalabka sida iyo booliiska. Waxaa la sheegay in gacan saddexaad ay maammushay habka diiwaangelinta oo ay masuul ka tahay lahaanshaha xogta. [58]



**Ciidamada Xoogga Dalka Soomaaliya oo lagu diiwaangalinayo qalabka sawirrada faraha**

54. Adam, "Somalia Financial Management Information System."
55. AFP, "Under Siege, Somalia Moves to Reform Its Army, Pay Troops."
56. SBRS, "Somali Business Registration System (SBRS)."
57. World Bank, "Toward a Somali Identification System: ID4D Diagnostic."
58. World Bank.

Dhawr ka mid ah Dawladaha xubnaha ka ah Dawladda Federaalka ayaa sida oo kale bixiya aqoonsiyada dawlad-goboleedka, degmada, ama cod-bixiyaha si ay u qabtaan macluumaadka cabbirka indhaha iyo faraha; ee qayb ahaan. Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada ayaa dhawaan daah-furtay Barnaamijka Badbaadada Qaranka (Baxnaano) oo lacag caddaan ah loogu wareejinayo dadka Soomaaliyeed ee tabaaleysan. Barnaamijkan, 188,000 qoys oo Soomaali ah ayaa lagu siiyay waraaqaha aqoonsiga, ka-faa'iideystayaasha waxa ku jira kuwo loo adeegsaday cabbirka indhaha iyo faraha.[59]

Ururrada caalamiga ah sida UNHCR iyo WFP waxa kale oo ay qabtaan faahfaahinta cabbiraadda indhaha iyo faraha si ay u bixiyaan waraaqaha aqoonsiga ee gargaarka ama xawaaladaha lacagta caddaanka ah. Sannadkii 2018kii, Haayadda Socdaalka Adduunka (IOM) oo taageero ka heleysa Waaxda Arrimaha Dibadda Mareykanka, ayaa dawladda ku taageertay in goobaha dalka laga soo galo lagu rakibo qalabka akhriya faraha; si loo hubiyo xogta dadka socotada ah ee ka dhanka ah keydka rasmiga ah ee hey'adda socdaalka Soomaaliya iyo digniinta ka dhanka dadka looga shakisan yahay dembiyada ee ku jira liisaska caalamiga ah.[60]



## Ka faa'iidaystayaasha WFP ee Soomaaliya ayaa sharciyeysay in ay lacagaha caawimada ah ku bixiyaan aqoonsiga dhigitaalka ah

59. NRC, "Linkages between Legal Identity and Housing, Land, and Property Rights in Somalia."
60. Burt, "IOM Installing 10-Digit Fingerprint Readers at Somalian Ports of Entry | Biometric Update."

Haayadda Cuntada iyo Beeraha ee Qaramada Midoobay (FAO) ayaa sidoo kale si cabbiraadda indhaha iyo faraha ah u diiwaangelisay oo waraaqo aqoonsi u siisay kalluumaysatada farsamada gacanta, iyada oo sheegtay in Nidaamka Xogta Aqoonsiga Kalluumaysatadu uu ka caawin doono kalluumaysatada sharciga ah ay ciidamada la-dagaallanka budhcad-badeeddu ay si fudud uga soocaan budhcad-badeedda.[61]

Natiijooyinka barnaamijyadaas kala duwan awgood, waxa lagu qiyaasay in ku dhawaad kala bar xogta shakhsiga ah ee dadka Soomaaliyeed ay ku kaydsan yihiin keydyo[62] kala duwan iyada oo xog muhiim ah lala wadaagayo Haayadaha caalamiga ah sida INTERPOL, dawladda Mareykanka iyo ururrada samafalka.[63]

Si kastaba ha ahaato'e, iyada oo hindisayaashan ay inta badan maal-galiyeen oo ay fuliyeen Haayado calami ahi, hirgelintooda waxaa lagu wajahnaa mashaariic gaar ah oo aan lagu darin bixinta waraaqaha aqoonsiga ee dadka oo dhan. Natiijo ahaan, waxay si weyn uga fogaadeen faragelinta tooska ah ee dawladda ama isku day kasta oo lagu aqoonsanayo aqoonsi rasmi ah oo dawladeed.

## 6. Aqoonsiga Dhigitalka ah ee loo Qorsheeyay Soomaaliya

2017kii waxa ay Dawladda Federaalka ahi shaacisay aqoonsi qaran oo beddela aqoonsigii burburay ee degaanka, kaas oo aan ahayn mid lagu hallayn karo caddaynta muwaaddiniinteeda, Aqoonsiga gaboobay waxa uu ahaa aan daboolaynnin garashada macamiishaada, oo fududayn kara dhaqdhaqaaqyada maaliyadeed. Hababkii aqoonsi ee jiray waxa ay halis hor leh ku ahaayeen hannaanka lacag-diritaannada Soomaaliya ee loo yaqaanno xawaaladda. Siyaasadda aqoonsiga dhigitalka ah ee Soomaaliya waxa ay rumaysan tahay in aqoonsiga dhigitalka ahi uu faadiido leeyahay fududaynta socodka xawaaladaha. Waxa uu kordhinayaa helitaanka adeegyada maaliyadda, oo ah kuwo kobcinaya ganacsiga iyo dhaqaalaha dhigitalka ah. Waxa uu horumarinayaa in adeegga la gaarsiiyo dadweynaha iyo fududaynta socodka nabdoon, nidaamsan ee dadka.[64]

Dawladda Federaalka ahi kolkii ay fahantay in ay hirgelin karto hab aqoonsi oo dhigital ah oo ay leedahay; waxa kale oo ay aragtay kaalmada waddamada kale iyo ururrada caalamiga ah sida Bangiga Adduunka. Waxa ay 10.3 milyan oo doollar oo gacan-qabasho ah ka heshay dawladda Baakistaan. Dhaqaaqalahaas waxa lagu fulinayaa tababarka, taageerada farsamo iyo waxyaabaha lagama maarmaanka u ah kaydinta xogta fudud (software) iyo agab-xogeedka (hardware).

---

61. Privacy International, "Biometrics and Counter-Terrorism: Case Study of Somalia | Privacy International."
62. WFP, "Somalia Databases and Beneficiary Registries for Cash Transfer Programming."
63. Jacobsen, "Biometric Data Flows and Unintended Consequences of Counterterrorism."
64. FGS, "Somalia Digital Identification Policy."

Waxa ay heshiis is-afgarad oo fahan ah la gashay Haayadda Xog-dhawrka Qaran iyo Maamulka Diiwaangelinta Baakistaan (NADRA) si ay u bixiso adeegyada la xiriira hirgelinta habka aqooni-samaynta qaran.[65] Bangiga Adduunkuna waxa uu ku raacay in uu bixiyo taageerada farsamo ee lagu dhisayo aasaaska habka aqoonsi ee Soomaaliya.[66]

Kaddib wada-tashiyo kala duwan, si loo dhiso Haayadda Aqoon-samaynta Qaran iyo Diiwaangelinta (DADSOM) waxa Golaha Wasiirrada ee Dawladda Federaalku ay ansixiyeen Xeer No.41. Xeerkan oo ay baarlamaanku meel-mariyeen Disember 2020kii oo uu saxeexay madaxweynuhu isla wakhitgaasi; waxa uu DADSOM awood u siinayaa inay abuurto oo ay joogtayso habka aqooni-samaynta qaran. DADSOM waxa ay u xilsaaran tahay b) diiwaanwelinta muwaaddiniinta iyo dadka dalka deggan iyada oo siinaysa tirsi gaar ah iyo aqoonsi qaran, b) ilaalinta xogta qofeed iyo cabbiraadda indhaha iyo faraha, j) isku-xidhka xarunta xogta iyo dadka iyo xarumaha gaarka ah ee bixiya adeegyada looga baahan yahay aqoonsi-samaynta iyo d) kor u qaadista adeegsiga aasaaska habka aqooni-samaynta.[67]

Dawladdu waxa ay ururin doontaa xogta qofeed sida magaca oo dhan, taariikhada dhalashada, jinsiga iyo tirsiga taleefanka oo ah mid laga tegi karo. Xeerku waxa uu qeexayaa in xog kasta oo la soo qaado in keliya lagu kaydiyo xarumaha xogta ee DADSOM iyo in qofka maamulaya halkaasi uu noqdo muwaaddin Soomaali ah. Dawladda Federaalka ahi waxa ay siyaasad ka leedahay aqoonsi-samaynta dhigitalka ah; waxaana ka go'an inay warqad Aqoonsi oo tirsi leh siiso qof kasta oo ku nool waddanka, sidaas awgeed looma baahna in qofku uu muwaaddin yahay. Waxa ay caddaysay in qof kasta u qalma la siin doono diiwaangelin, sidaas awgeed qofna dokumenti la'aan iyo aqoonsi la'aan awgeed uma waayi doono adeegyada dadweynaha.

2023ka dhexdiisa, Doorashadii sannadkii hore ee ay ku yimaaddeen madaxweynaha iyo raiisal-wasaaruhu awgeed; dhawr xeer ayaa lagu celiyay si ay dib ugu eegaan golaha wasiirradu. Waxa kuwaas ku jira xeer No.41 (Xeerka aqoonsi-samaynta qaran iyo Haayadda diiwaan-gelinta) kaas oo dib loo habeeyay, lana beddelay. Tallaabooyinkaas waxa ku jira is-beddel lagu sameeyay qaabdhismeedka ururka DADSOM, waxaana ka mid ah in magaceeda laga dhigay NIRA (Haayadda Aqoonsi-samaynta iyo diiwaangelinta qaranka). NIRA waxa lagu dhisay xeerka cusub ee aqoonsi-samaynta iyo diiwaangelinta dadweynaha kaas oo uu saxeexay madaxweynuhu Maarso 2023a, taas oo ka dambaysay ansixintii labada aqal ee baarlamaanka. [68]

65. FGS, "Somalia and Pakistan Sign Memorandum of Understanding 'MoU' for Cooperation between the Two Countries."
66. Hersi and Mahadallah, "Challenges and Solutions for the Development of an ID System in Post-Conflict Areas."
67. FGS, "Law No. 41 -The National Identification and Registration Authority Establishment Law."
68. SONNA, "President of Somalia Signs Eight Laws to Strengthen the Foundation of the Somali Government."

Xeerka cusub waxa ku jira caddaymo cusub oo muujinaya xuquuqda dukumentiyada aqooni-samaynta, baahida loo qabo helista aqoonsi-samaynta, xogta ay tahay in la ururiyo iyo habka loo maarayanayo cabashooyinka. Wasiirka Arrimaha Gudaha, Arrimaha Federaalka iyo dib u heshiisiinta ayaa u xil saaran in uu bixiyo hageyaashaa faafaahinaya habka diiwangelinta iyo bixinta aqoonsiga qaran, qiimaha diiwaangelinta, astaanta NIRA iyo arrimaha la xiriira maamulka. Waxa ugu muhiimsan inay bixinayso guddida dusha kala soconaya (Guddida maamulka[69]) kuwaas oo dib u eeganaya qorshaha shaqo ee ururka, miisaaniyadda iyo xeerarka iyo hab-shaqeedka ururka.

Marka lagu daro sharcidajinta iyo magac beddelka, waxa ay NIRA si firfircoon ugu hawllan tahay kobcinta awooddeeda hay'adeed, wanaajinta iyo ballaarinta xiriirka ee ay la leedahay daneeyayaasha kala duwan iyo dhisidda aaminaadeedda. Ururku waxa uu qalabaynayaa waxqabadkiisa shaqo, isaga oo kobcinaya xirfadaha lafdhabarta u ah shaqadiisa sida tignoolajitadda, oo ay ku lammaan yihiin dajinta siyaasado iyo habraacyo wax ku ool ah, kuwaas oo xaqiijinaya habsami-socodka hawlgalladeeda. Waxa intaas dheer, in NIRA ay dajinayso aalado dhijitaal ah oo ay ka mid yihiin nidaamka maamulka aqoonsiga shaqaalaha, kuwaas oo maraya heerka dib-u-eegista shuruudaha iyo tijaabinta softiweerrada ay kuwada xiriirayaan NIDRA. Dadaalladani waxa ay ku xiran yihiin istaraatiijiyadaha diiwaangalinta, ku xiriirsanaanta nidaamyada kale, waaritaanka dhaqaalaha iyo hababka lagu xaqiijinayo bixinta adeegyada, oo aan ku koobnayn oo kaliya hay'adaha dowladda, balse sida oo kale ay ka qayb yihiin hay'adaha gaarka loo leeyahay ee ay ka midka yihiin laamaha duulista, bangiyada iyo isgaarsiintu.

Awood bixiyaha muhiimka ah ee aqoonsiga dhijitaalka ah ee la soo jeediyay ee Soomaaliya; waa sharciga ilaalinta xogta dadweynaha ee dhawaan la ansixiyay, kaas oo ilaalinaya xogta qof ahaaneed oo dejinaya soohdimaha xog-ururinta, habaynta, wareejinta, iyo adeegsiga. Xeerkan waxa uu si rasmi ah u saxeexay madaxweynuhu bishii Maarso 2023ka, waxaana uu dhisaya haayad ilaalinaysa xogta sida wakaalad madax bannaan oo masuul ka noqon doonta dhaqangelinta sharciga iyo fulintiisaba. Marka laga soo tago qodobbada soo-jireenka ah sida xuquuqda mawduucyada xogta iyo habka, u hoggaansanaanta iyo hababka fulinta, sharcigu waxa uu qeexayaa shuruudaha wareejinta xogta ee soohdimaha. Iyada oo uu sharcigu reebayo in xogta shakhsiga ah loo wareejiyo haayado ka baxsan awoodda Dawladda Federaalka, waxa uu fasaxayaa wareejinta noocaas ah; haddii cidda heshay ay leedahay heer ilaalineed oo ku filan.

69. The Board consists of representatives from The Ministry of Interior, Federal Affairs and Reconciliation, Ministry of Health, Ministry of Internal Security, Ministry of Communications and Technology, Ministry of Commerce and Industry, Ministry of Finance, Ministry of Labour and Employment Office of the Attorney General and the Director of NIRA.

### Sanduuq 3: Warqadda Aqoon-samaynta qaran iyo Haayadda Diiwaangelinta (2023)

**1. Waxa ay tahay:** Hirgelinta habka diiwaangelinta iyo aqoonis-siinta muwaaddiniinta si loo helo tirsi aqoonsi oo gaar ah.

**Cidda u qalanta:** Muwaaddiinta iyo dadka dalka deggan (marka laga reebo dalxiiseyaasha)

**2. Baahida:** caddayn ah dokumentiyo aqoonsi (dukumiinti ama wax u dhigma oo caddeynaya qofnimadiisa)

**3. Xogta la ururin doono:** magac buuxa, magaca hooyada, taariikhda dhalahsada, goobta dhalashada, jinsiga, sawir, aqoonsiga faraha (10) ama isha, tirsiga taleefanka ama ciwaanka email

**4. Ilaalinta xogta:**

- Lama ururinayo xog xasaasi ah oo loo adeegsan karo in lagu faquuqo ama reebo qof
- Xogta looma adeegsan karo dano dhaafsan kuwa loogu talogalay, marka laga reebo kuwa uu sharcigu fasaxayo
- Xogta la ururiyo waxa lagu kaydin doonaa xog-dhawrka ururka

**5. Fee:** TBD (bixinta Tirsiga, Daabacista Kaarka Aqoonsiga iyo adeegyada aqoonsi ee kale waxaa khidmadda lagu jaangoynayaa xeer-nidaamiye uu soo saarayo Wasiirku)

# 7. Faa'iidooyinka Dihin ee Aqoonsiga Dhigitalka ah

Waxa jira tiro habab ah oo aqoonsiga dhigitalka ah ee Soomaaliya uu noqon doono mid waxtar u leh, taasna uu kala siman yahay Hindiya oo hirgelisay habka aqoonsi-samaynta dhigitalka ah. Ugu horreyn, aasaasidda hab aqoonsi oo dhigital ahi waxa ay dawladda u fududayn doontaa inay si sharci ah u garato bulshadeeda oo ay siiso aqoonsi uu dastuurku u aqoonsaday in uu yahay caddayn aqoonsi. Marka taas la sameeyo, dawladdu waxa ay helaysaa xogta aasaasiga sida (magaca, jinsiga, meesha dhalashada, taariikhda dhalashada iyo haddii ay suurtagal tahay faahfaahinta cabbiraadda indhaha iyo faraha) ee dhammaan dadka hoos taga maamulkeeda. Xogtani waxa ay dawladda u fududaynaysaa inay siiso waraaqo aqoonsi oo sharci ah oo ay garato qofka, saxdo aqoonsigiisa iyo xaqiijinta iyo hubiso in qofku yahay ka lagu sheegi karo ka uu yahay.[70]

70. Trikanad and Sinha, "Digital Identities: Design and Uses."

Dawladdu waxa ay awood u yeelanaysaa inay socodsiiso aasaaska hab dhigital ah oo shaqaynaya, tusaale ahaan, inay bixiso foomamka aqoonsi ee waraaqaha aqoosniga, baasabboorka, shahaadooyinka guurka, liisammada gawaarida, iyo foomamka kale ee aqoonsi ee fududeeya in ay dawladdu gaarsiiso adeegyadeeda degaannada leh internetka iyo kuwa aan lahayn.

Aqoonsiyada dhigitalka ahi waxa ay fududeeyaan qaadista tirikoobka, codbixinta, ururinta cashuuraha, lacagbixinta, ganaaxyada iyo u wareejinta daryeelka ku socda dadka jilicsan ee bulshada, Waxa uu u noqon doonaa qalabka lagu diiwaangeliyo hantida iyo ganacsiyada, loona adeegsado xallinta murannada ka dhasha lahaanshaha hantida.

Dadka la waraystay waxa ay ku nuux-nuuxsadeen sida loogu baahan yahay diiwaangelinta kaararka taleefanka iyo gaadiidka, maaddaama oo ay jireen tiro waxyaabaha qarxa oo lagu rakibay gaadiid iyo taleefanno. Qaarkood waxa ay yiraahdeen diiwaangelinta sharciga ahi waxa ay dawladda u oggolaan doontaa inay ururiso caddaymaha kaddib marka ay qaraxyadu dhacaan iyo inay ka hortagto weerarrada lagu xidho taleefannada. Si kasta ha ahaato'e; waa muhiim ah in la ogaado in sidoo kale ay jireen hubanti la'aan ku saabsan u isticmaalka aqoonsiga dhijitaalka ah ee habkan.

Dawladda ka sokow, dadka la waraystay waxa ay qireen muhiimadda uu aqoonsiga dhigitalka ahi u leeyahay xarumaha aan dawliga ahayn. Waxa ay tilmaameen in aqoonsiga dhigitalka ahi uu lagama-maarmaan u yahay u yahay fahanka higsiga ah inaad barato qofka aad la xiriirayso "garo macmiilkaaga" ee xarumaha gaarka ah, gaar ahaanna xarumaha maaliyadda iyo is-gaarsiinta, oo kor u qaadaya dhaqaalaha dhigitalka ah. Sida oo kale waxa la filayaa in aqoonsiyada dhigitalka ah ay gargaaraan soo-kabashada dhaqaalaha waddanka, oo ay horseed u noqdaan ganacsi meelmar ah iyo in ay yareeyaan qiimaha iibka beenta ah marka ganacsiyadu ay dhexgalaan hannaanka dawliga ah ee u baahan xaqiijinta iyo hubinta. Taas ka horjeedkeeda, aqoonsiga dhigitalka ahi waxa uu door muhiim ah ka ciyaarayaa gaarsiinta adeegyada gargaarka ah ee ay bixiyaan ururrada aan dawliga ahayn ee ka hawlgala dalka. Waxa uu fududayn karaa wareejinta naqadka iyo adeegyada gurmadka ah xilliyada iyo abaaraha iyo xaaladaha kale ee degdegga ahi jiraan.

# 8. Caqabadaha iyo Khataraha

Bilaabista hababka aqoonsi-samaynta dhigitalka ah ee waddamada sida Soomaaliya ahi waa kuwo kakan, oo maraya heerar ballaaran oo leh caqabado farsamo, urur, bulsho iyo siyaasadeed

Haddii aan ku bilawno, kaabayaasha farsamo iyo xogaha ee aan ku filnayni waxa ay hababkan u horseedi karaan khataro nabadgelyo iyo dhawrsanaaneed, waxa aanay kordhin karaan suurtagalnimada ah in xogta la jabsado, luminta xogta xasaasiga ah, xadista aqoonsiga iyo walaacyo la xiriira dhawrsanaanta xogta gaar ahaaneed. Kaabayaasha aan dhammayska tirnayn iyo khad la'aantu waxa ay hoos u dhigi karaan habka diiwaangelinta. Marka lagu daro waxa jira khibradda farsamo ee yari waxa ay horseedi kartaa caqabado hirgelineed iyo hawgal oo dhawr ah.

Waxa caqabad kale oo muhiima ah is-waafajinta iyo hubinta wada-shaqaynta nidaamka aqoonsiga dhijitaalka ah ee cusub ee dawladda hadda jirta iyo nidaamyada kale.

Dhanka kale, isku-dhafka nidaamka cusub iyo kuwa dawladda ee jira iyo nidaamyada kale iyo in la hubiyo wada-shaqeyntoodu waa caqabad muhiim ah. Haddii aanay jirin is-dhexgalka farsamada iyo halbeegyadu; nidaamka cusub ee aqoonsiga dhijitaalka ahi waxa uu halis u yahay inuu guuldarreysto, maadaama oo aanu awoodi doonin inuu si ku filan u aqoonsado, oo u xaqiijiyo shaqsiyaadka.

In kasta oo aan wax badan laga ogayn doorashada tignoolajiyadda ee nidaamka cusub ee aqoonsiga Dhijitalka ah ee Soomaaliya, waxa jirta khatar ah in iibiyaha ama adeeg-qeybiyaha lagu xiro - xaalad aanay dawladdu ku wareejin karin ama u guuraan nidaam kale sababta oo ah kharashka beddelka oo sarreeya ama kakanaanta socdaalka xogta. Xaaladdu way ka sii xumaan lahayd haddii adeeg-qeybiyuhu uu yahay shisheeye iyo in nidaamka iyo xogta hoose lagu martigeliyo dalka dibaddiisa. Adeeg-eybiyeyaashani waxa ay wax u dhimi karaan nidaamka, u oggolaan karaan inay xogta dadka kale helaan ama xitaa diidaan is-beddelka nidaamka ama ku wareejinta dawladda.

Marka laga reebo caqabadaha farsamada, nidaamka aqoonsiga dhijitaalka ah ee Soomaaliya ee la soo jeediyay waxa uu wajahayaa caqabado door ah oo ay uga sii xumaynayaan awoodaha haayadaha oo gaabis ahi, doorarka iyo masuuliyadaha oo aan caddayn iyo haayado burburay. Agabyada sharciga ah ee xoojinaya nidaamka cusub sida xeerarka sirta ah ayaa sida oo kale laga yaabaa in aanay noqon kuwo dhammeystiran xilligan, waxaana ay horseedi karaan in lagaga doodo maxkamadaha sida ka dhacday waddamada kale.

Tusaale ahaan, sharciga aqoonsiga iyo diiwaangelinta (Sharciga Diiwaangelinta Aqoonsiga Dadweynaha) ee hadda jiraa waa mid aan caddaynnin ujeeddooyinka loogu talagalay xogta la ururin doono oo aan si cad u tixraacin sharciga ilaalinta xogta ee dhowaan la ansixiyay. Sida oo kale ma qeexna sida nidaamkan cusubi uu ugu shaqeyn karo nidaamka federaalka oo aan xasillooneyn, isla markaana leh dastuur aan dhammeystirneyn. Tusaale ahaan ma cadda doorka iyo awoodda Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka ee soo saarista iyo dayactirka waraaqaha aqoonsiga dhijitaalka ah iyo xogta hoose. Intaa waxaa dheer, khilaafaadka siyaasadeed ee soo noqnoqda iyo xiisadaha oo saameyn weyn ku yeelan doona qaabeynta iyo ka bixidda nidaamyada.

Waxa laga yaabaa in habka cusub ee aqoonsiga dhigitalka ahi uu iska caabbin kala kulmo saamiley kala geddisan sida muwaaddiniinta, bulshada rayidka iyo waaxda gaarka ah. Iska-caabbintani waxa ay dhalan kartaa aamminaad-la'aan taas oo ay sababi karto warxumotashiil ku aaddan nabadgelyada iyo walaacyada ah dhawrsanaanta xogta. Hal werwer oo weyni waxa uu yahay dabagalka dawladda, taas oo laga yaabo inay si khaldan u adeegsato xogta laga soo ururiyay muwaaddiniinta si ay u ilaaliso dhaqdhaaaqooda, una beegsato iyada iyo u eegaysa astaamaha degaannada ee dadka. Walaacyda dabka ku hurin kara iska-caabbiga waxa ka mid ah iyada oo la ballaariyo adeegsiga aqoonsiga dhigitalka ah iyo xogaha ku hoos jira, loona adeegsado wax dhaafsan ujeeddadii rasmiga ahayd iyo in lagu xadgudbo xog-wadaagga.

Waxa halis kale oo weyn ah in laga reebo dadka qaarkood, taas oo suurtagal ka dhigaysa in la waayo waxtar ay heli lahaayeen dad muwaaddiniin ah iyo dad waddanka deggani. Kooxo cayiman oo bulshada ah sida naafada ama kuwa faraha uu dhaawacu ka gaadhay waxa laga yaabaa inay ku adkaato isu-diiwaangelinta aqoonsiga dhigitalka ahi. Qaar kale waxa laga yaabaa in ay ka cagajiidaan is-diiwaangelinta; waayo waxa gaari kara xog majare-habaabisa iyo aamminaad-xumo. Waxa uu shaki ka geli doonaa sida xogta loo adeegsan doono. Dhaqaalaha ayaa isna noqon kara caqabad is hortaagta in dadka qaarkood ay helaan aqoonsiga dhigitalka ah.

# 9. Gunaanadka iyo Talabixinaha Siyaasadeed

Waxa maangal ah in mashaariicda aqoonsigu ay horumariyaan tayada nolosha muwaaddiniinta iyaga oo fududaynaya gaarsiinta aan muuqannin ee adeegyada dawladda iyo ganacsiga. Waxa ay kor u qaadayaan aqoonsiga iyo xaqiijininta onlaynka ah. Sidii lagu sharxay warqaddana, waxa mashaariicdan ku laran khataro dhawr ah oo ka bilaabmaya kuwo siyaasadeed, kuwo farsamo iyo urur, oo dhalin kara natiijo waxyeello leh oo aan lagu talogelin. Cilmibaaristu waxa ay daaha ka qaadday sida hab aqoonsi-samayn ah oo la bilaabaa uu u noqon doono mid kakan. Taasna waxa sabab u ah khayraadka xaddidan, caqabadaha siyaasadeed iyo kuwa bulsho. Xaaladda waxa sii adkaynaya qaabdhismeedka federaalka ah ee wakhtigan jira, ku lug-lahaanshaha xarumaha shisheeye iyo sii-jiritaanka hababka aqoonsi ee burburay.

Iyada oo la tixgelinayo in mashaariic dhawr ah oo aqoonsi-samayn ahi ay ku fashilmeen adduunka, waxa muhiim ah in tirada lagu daro unugyada doorka ku leh habka aqoonsiga dhigitalka ah. Cilmi-baaristani waxa ay tilmaamaysaa inay jiraan qodobbo muhiim u ah guusha kuwaas oo loo baahan yahay in ay meesha ku jiraan si hirgeliyo, lana joogteeyo guusha aqoonsiga dhigitalka ah ee Soomaaliya.



1. Dawladdu waa in ay xoojiso oo ay casriyayso **diiwaangelinta bulshada iyo hababka istaatikada** ee lagama-maarmaanka ah si ay u xaqiijiso in si sax ah isla markaba loo diiwaangeliyay dhammaan dhacdooyinka aasaasiga ah, laga bilaabo dhalashada illaa dhimshada dhammaan dadka la diiwaangeliyay. Hannaanka cusub ee aqoonsi-samaynta dhigitalka ahi waa in uu ku xidhnaado dhammaan hababkaas si loo xaqiijiyo in xogaha aqoonsiga isku mar qudha lagu ururiyo.



2. **Haayadaha ku shaqada leh sharuucda iyo qawaaniintu,** waa in ay goob-joog noqdaan si ay wakaalado gaar ah awood ugu siiyaan nashqadaynta iyo diiwangeelinta habka aqoonsiga dhigitalka ah, una qeexaan sida xogta loo ururinayo, loo ilaalinayo, loo adeegsanayo iyo waxa ugu muhiimsan oo ah in hababka indha-indhayntu ay hubiyaan milgaha habka cusub. Haayadaha maamulku waa in ay lahaadaan xirfado ku aaddan ilaalinta xogta qofeed iyo xaqiijinta in aan dad laga reebin ama xannibin in uu adeeggu gaadho. Haayadaha maamulka ee xilka hayaa waxa kale oo ay u baahan yihiin inay ku xirnaadaan qaabdhismeedka dawladda federaalka ah ee talinaysa iyo inay raacaan dastuurka ee xeerarka kale ee xiriirka la leh hawsha.



3. Waxaa muhiim ah in la helo **hannaan ka qaybqaadasho oo loo dhan yahay,** kaas oo aan loo abuurin oo keliya wacyigelinta ku saabsan nidaamka cusub, balse sida oo kale suuragalinaya in daneeyayaasha la gala tashado hababka ugu wanaagsan iyo kuwa ugu dhibta yar ee lagu diiwaan gelin karo muwaaddiniinta. Iyada oo loo marayo ka-qaybgalka daneeyayaasha, waa in sida oo kale la sameeyaa laylis ku saabsan dhisidda kalsoonida, halkaas oo dawladda ay ku daahfurayso sida ay doonayso in ay nidaamka aqoonsiga dhijitaalka ah uga ilaaliso faragelinta shisheeyaha iyo in si xun loo adeegsado xogta.



4. Dawladdu iyada oo la kaashanaysa aqoonyahannada iyo ururrada kale ee bulshada rayidka ah; waa inay sameeyaan **daraasado aragtiyeed** si ay u fahmaan sida kooxaha kala duwani u arkaan, una fahmaan nidaamka cusub ee aqoonsiga. Daraasadaha noocan oo kale ahi waxa ay ku siin karaan aragtiyo ku saabsan sida loo qaabeeyo, loona hirgeliyo nidaamka, si loo hubiyo in la wada heli karo, oo lagu wada kalsoon yahay dhammaan.




5. Dawladdu waa in ay mudnaan siisaa **dhisidda awoodda xarumaha,** taas oo kobcinaysa awoodda iyo kartida dawladda, si ay ugu guulaysato horumarinta iyo hawlgelinta hababka aqoonsiga dhijitaalka ah oo tayo leh, oo nabdoon.



6. Waa in la isla qaato **naqshadaynta Aqoonsi Dhijital ah oo sax ah** kaas oo ka jawaabaya baahiyaha bulshada iyo adeegga uu bixiyo lana waafajinayo macnaha guud iyo xaaladda taagan. Soomaaliya oo ah dal federaal ah, lehna dastuur aan loo dhammeyn, isla markaana ah dal ka soo kabanaya colaado iyo xasillooni darro soo jiray sannado badan, waxay u baahan tahay nidaamka aqoonsiga dhigitalka ah oo debecsan, kaas oo ay ku heshiiyeen dhammaan dhinacyada ay khuseysaa. Tan waxa ku jira go'aaminta ah in la yeesho nidaam aasaasi ah ama mid shaqaynaya. Waxa kale oo muhiim ah in la go'aamiyo in la haysto hal adeeg-bixiye oo ah hab dhexe ama qaab-dhismeed federaal ah; halkaas oo haayado badani ay sii bixiyaan aqoonsiga dhigitalka ah. Tixgelinta kale waxa ka mid ah caddaynta loo baahan yahay ee diiwaangelinta, kharashka, iyo goobaha. Doorka jilayaasha dibadda ayaa sida oo kale u baahan in la caddeeyo oo lagu koobo doorka taageerada.



7. **Kaabayaasha dhigitalka** ah oo ay la socdaan shaqaale karti leh iyo taageero ururro ahi; waa lama huraan. Higsigu aha oo keliya in la xaqiijiyo amniga iyo sharafta nidaamka laakiin sida oo kale, waxa ay taageeradaasi muhiim u tahay habsami u shaqayntiisa. Waxa kale oo lagama maarmaan ah in la wanaajiyo isku xirka iyo daboolidda internetka si loo ballaariyo kaabayaasha dhigitalka ah inta lagu jiro is-qorista iyo adeegsiga.



8. Nidaamka cusub ee aqoonsigu waa in uu tixgeliyaa, nidaamyada isku xiran, kuwaas oo fududaynaya in ay xog-wadaag noqdaan hay'adaha kala duwan ee ay ka midka yihiin heerarka dowladda iyo adeeg bixiyayaasha kale.



9. Si loo hubiyo in xubnaha jilicsan ee bulshadu aanay uga harin da'da casriga ah ee maanta, waxaa lagama maarmaan ah in dawladdu ay yeelato **qorshe ah inay ku darto dhigitalka**, oo tixgelinaya baahidooda iyo xaaladahooda. Qorshahan waa in lagu daraa hirgelinta habab kale oo loogu talagalay diiwaangelinta iyo bixinta dukumentiyada aqoonsiga shakhsiyaadka naafada ah, kuwa ka wax yeelloobay faraha ama ku nool meelaha ay adag tahay in la gaaro.



10. Dawladdu waxay u baahan tahay inay **is-waafajiso nidaamyada aqoonsiga ee jira** oo lagu darayo nidaamka cusub; si looga fogaado in la bixiyo aqoonsiyo nuqul ah. Waxaa ka sii muhiimsan in dawladdu ay la wareegto nidaamka aqoonsiga ee ay maamulaan Haayadaha dibadda ah, ama ugu yaraan ay xaqiijiso in xogta gaarka ah ee nidaamyadaasi ay tahay mid si buuxda loo ilaaliyo oo hoos timaadda awoodda dawladda Soomaaliya.

HERITAGE

INSTITUTE

The Heritage Institute for Policy Studies
http://www.heritageinstitute.org